


Returning to Somalia

**Dib ugu
noqoshada
Somaliya**



Hibiscus Initiatives provide advocacy, support and specialist services to marginalised migrants affected by the criminal justice and immigration systems to enable informed choices and positive change. We promote justice and respect to reduce inequalities.

The charity's work falls within four broad categories:

- Community and prisons
- International resettlement and detention services
- Anti-trafficking
- Volunteering and mentoring

The international resettlement programme provides a support service to clients to facilitate their reintegration into the community in their country of origin.

Through providing resettlement related support and practical assistance we aim to ensure the smoothest possible transition for our clients returning to their home countries. Often this can mean signposting to organisations providing support, finding accommodation, getting identification documents and passports back, helping with internal travel, liaison with families and providing resettlement grants to aid small business start-ups.

Our work is important to clients that have exhausted their rights to be in the UK, those that wish to depart voluntarily, or those who are being deported at the end of serving a sentence for a criminal offence.

Contact us

If you would like to know more about Hibiscus Initiatives, receive support, or know a friend or family member who may need our assistance, please contact:

Hibiscus Initiatives

Resource for London
356 Holloway Road
London N7 6PA

Email: info@hibiscus.org.uk

Website: <https://www.hibiscusinitiatives.org.uk>

Phone: +44 (0)20 7697 4120

Fax: +44 (0)20 7697 4272



Contents

Introduction	4
Planning for your return	5
Reintegration assistance	
Medication	
Family and friends	
Faith-based organisations	
What to expect on arrival	6
Arrival at the airport	
Transport	7
Essential information and important documents	8
ID cards	
Driving licence	
Opening a bank account	
Accommodation	9
Healthcare	10
Overview	
List of hospitals	
Sexual and reproductive health	
Psychosocial counselling	
Education and employment	11
Education	
Employment and training	
Useful information	12
Cost of living	
Significant dates and public holidays	
Emergency contact numbers	
Map of Somalia	13
Disclaimer	14

Introduction

This booklet has been designed to provide you with information that will help ease your return to Somalia. Inside it you will find useful general information about your return, what to expect and a list of contact details of organisations that may be able to help with any resettlement related issues you encounter.



Planning for your return

The more planning that is done for your return to Somalia, the easier it will be for you to benefit from support services when you arrive. There are a number of things to think about before you depart the UK, such as: who will meet you at the airport? Where will you stay? Can family or friends support you emotionally, financially or help you to familiarise yourself with life in Somalia?

Before your departure, you may want to consider:

Reintegration assistance

You may be eligible to apply for reintegration assistance organised by the International Organization for Migration (IOM) as part of the EU-IOM Joint Initiative in Africa.

They can offer immediate assistance on arrival to returnees which includes a meet and greet service at the airport with onward transport, overnight accommodation, emergency medical treatment and some money for your immediate needs. They have a wide network of contacts within other organisations and can refer you to other support depending on your individual needs. They can also help you to access skills training and job fairs.

Somali nationals returning from the UK and wishing to benefit from this programme of support must be referred by a UK organisation before travelling to Somalia. Staff from Hibiscus Initiatives can contact IOM on your behalf to make an application for support. It is important that you give as much notice as possible to make sure you have the best chance of receiving support.

Medication

It is important to talk to your doctor before leaving for Somalia. If you are currently taking medication, your doctor should be able to advise you on how to source further medication. It might be beneficial for you to request a letter from a GP or doctor, detailing your condition. The more information you have about your medical condition, the easier it will be to continue treatment after your arrival.

Family and friends

If you have family or friends living in Somalia, you may wish to tell them of your arrival in case they can support you with your immediate needs upon your return. Try to take their contact details with you to the airport so that you can contact them on arrival or before you leave.

The British Red Cross provides a free service aimed at restoring contact between families that have been separated. You may access this programme by directly contacting them at:

Address: British Red Cross, UK Office, 44 Moorfields, London EC2Y 9AL

Email: contactus@redcross.org.uk

Phone: +44 (0)344 871 1111

Website: www.redcross.org.uk

Faith-based organisations

There may be faith-based organisations in the UK that can suggest avenues of support and places of worship where you will be returning. Faith-based organisations can often provide essential basic support to those of all faiths or with no faith. A good place to start would be to contact members of your local community or faith-based leaders. It is advisable to make enquiries with these organisations or communities early on so that suitable arrangements can be made for you.

What to expect on arrival

Arrival at the airport

Once you have disembarked from the aircraft you will be taken to the airport where administrative services will be carried out for your re-entry into Somalia.

Now that you are in Somalia, you may want to start thinking about being reunited with family and friends, finding a job, getting a new ID and so on.



Transport

The main point of entry into Somalia by air is Mogadishu International Airport. There are various options to travel within Somalia by road.

Buses

Bus services are the most common form of transport in Somalia. In large towns and cities, local buses will stop anywhere along the roadside and can be flagged down. Intercity buses go between Hargeisa, Borama, Burao and Berbera and cost less than US \$1. Shared pick-ups are common in Somalia and passengers simply jump on and off the vehicle which is usually a truck.

Taxis and rickshaws

Taxis can be picked up from the street and cannot be booked in advance. Taxi companies such as Mogadishu Taxis and City Taxi charge between US \$8-\$25 for journeys within Mogadishu.

Yaasmiin Transportation Group offer taxi services around the country. Trips can be booked by phone or via their website:

Phone: +252 907 722 660

Website: <https://yaasmiingroup.com/website>

Auto rickshaws known as 'Bajaj' are half the price of local buses and prices can be negotiated.



Essential information & important documents

ID cards

The national ID card is issued by the local administration in Mogadishu. It is advisable to apply directly with your local administration office for new and replacement ID cards and to avoid third party suppliers as they are not always genuine.

You are required to carry an ID card with you when moving around the country. The ID card is also required for employment, opening a bank account, registering for a school place, buying a mobile phone, as well as accessing public services. It can take several days for ID cards to be produced. ID cards cost approximately US \$17-\$19.

It is also possible to obtain an ID card when applying for a passport as they are often issued together. Passports cost approximately US \$110.



Driving licence

You can apply for a driving licence at the Ministry of Public Transport in Mogadishu. You must apply in person and give your full name, date and place of birth and four passport sized photographs of yourself. A driving licence costs approximately US \$170. You will also need to pass a driving test in order to drive in Somalia.

There are different types of driving licences issued by the Ministry of Public Transport and these relate to the size of vehicle you want to drive - 'Grade A' licence is for vehicles up to the size of a land cruiser, 'Grade B' is for buses and lorry trucks, 'Grade C' is for double trailer trucks and heavy machinery.

Opening a bank account

If you are opening a bank account in Somalia, you will need to bring documentation to prove your identity and residency. If you do not have the exact documents the bank specifies, it may still be possible to start the process if you meet with the bank manager to talk through your personal circumstances.


There are many commercial banks operating in Somalia such as Salaam Bank, Dahabshil, Amal Bank and Premier Bank.

Accommodation

If you are unable to stay with family and friends you may be able to find short-term accommodation. B&B's and hostels can be a cost-effective option in major towns and cities. You can use the following websites, when in the UK or in Somalia, to find accommodation, however you might be asked to contact the property to book and pay:

<https://www.hostelworld.com>
<https://www.booking.com>
<https://www.expedia.com/Hotels>
<https://www.airbnb.com>

The International Organization for Migration (IOM) can offer overnight accommodation upon arrival in Somalia as part of their reintegration assistance package offered to eligible people. This will need to be arranged in advance of your flight to Somalia. Staff from Hibiscus Initiatives and some other organisations can contact IOM on your behalf to check your eligibility and set this up. It is important that you give as much notice as possible that you will need accommodation on arrival so that you have the best chance of receiving support.



Healthcare

Overview

There are public and private healthcare options available in Somalia. All medical care has a fee, however there are some medical services provided by non-governmental organisations that may be offered free of charge.

Private healthcare services are well established and growing in Somalia through specialist clinics and private hospitals. These services are generally more expensive than public healthcare services.

List of hospitals

East Bardera Mothers and Children's Hospital

Address: Baardheere, Gedo
Phone: +252 61 754 7871

Erdoğan Hospital

Address: Mogadishu
Phone: +252 61 112 2595

Erdoğan Hospital

Address: Presidency Road, 26 June District, Hargeisa
Phone: +252 2 523 114

Gargaar Multispeciality Hospital

Address: Gargaar Hospital Road, Hargeisa
Phone: +252 63 451 4727

Sexual and reproductive health

The United Nations Population Fund (UNFPA) are working with the Government to ensure reproductive health services and supportive programmes are available to young people. Practitioners may provide free outreach care and clinics in Mogadishu that provide information on sexual reproductive health, sexually transmitted infections and information about birth spacing. There may also be health institutes also providing emergency obstetric care and treatment for those who have experienced sexual and gender-based violence. Contact your local clinic for more information.

Psychosocial counselling

If you have mental health needs or require counselling services, you may be able to be referred to appropriate support by speaking to your doctor.

The following hospital operates in Mogadishu and provides counselling and psychological support for those with mental health needs:

Habeb Public Mental Hospital & Rehabilitation Treatment Center


Address:
Phone: +252 61 589 9081 (Dr. Habeb)
Email: jHabebmnh@gmail.com

Education & employment

Education

Education options are available in major towns and cities. There is often a fee for education, however some non-governmental organisations may offer free education programmes, such as UNICEF that work across Somalia delivering basic education and skills development, as well as education for children affected by emergency situations. In schools, lower-primary education lasts for four years from the age of 6, followed by another four years of upper-primary education, where children are taught nine compulsory subjects.

Secondary education lasts for four years from the age of 15 to 18 years, after which students sit a Puntland Secondary School Certificate Examination (PSCE). If you have successfully completed secondary school, students have the option to enroll in higher education degree programs with a university. Degrees normally last for four years.



Employment and training

Vocational training is available in urban areas for unemployed adults and young people. This is usually offered by non-governmental organisations that provide support with skills training and employment opportunities, such as the organisations shown opposite:

Shaqodoon Organization

Offers entrepreneur schemes for people aged 15 to 35 years across Somalia and Somaliland, to help them get into employment. They offer business skills training including in areas such as ICT. They then aim to find employment to match each individual person's skills.

Their upcoming training programmes are often advertised via their social media pages.

Phone: +252 2 515 777

Email: info@shaqodoon.org

Website: <https://www.shaqodoon.org>

Facebook: <https://business.facebook.com/ShaqodoonOrganization/>

Instagram: @shaqodoon.org_252

Borama Youth Job Centre

A non-profit organisation based in the northern city of Borama in Somaliland. They deliver several services for young people who are unemployed and looking to find a career. They organise experience sharing events to inspire and motivate job seekers to start businesses of their own.

They offer technical skills training for areas of work such as mobile phone repairing, plumbing, electricals, make-up, tailoring and baking. Their employability skills training is designed to help job seekers write a C.V and improve their interview techniques. There are also specific programmes available to help people with writing a business plan and to start up a small business of their own.

WhatsApp: +252 63 441 0299

Email: byjobcentre@gmail.com

Facebook: <https://business.facebook.com/byjobcentre/>

Useful information

Cost of living

Food	Price (USD, \$)
Bread 1 loaf	0.65
Milk 1 litre	1.34
Water 1.5 litre bottle	0.58
Rice 1kg	1.02
Eggs 12	2.19
Cheese 1kg	5.75
Chicken breasts 1kg	4.32
Beef 1kg	1.03
Potatoes 1kg	0.90
Onions 1kg	0.90
Lettuce	1.00
Tomatoes 1kg	2.68
Oranges 1kg	3.72
Apples 1kg	1.38
Bananas 1kg	90.80
Transport	
One way ticket (local transport)	0.25
Taxi 1km	20.00
Taxi 1 hour	10.00
Others	
1 min. of prepaid mobile tariff (local)	0.09
Internet (60 mbps or more, unlimited data)	25.00-32.00
Formula milk	10.00
Diapers	0.05-0.07 per diaper
Salaries	
Average monthly net salary (after tax)	362.50

Correct in October 2021

Significant dates and public holidays


Date	Holiday name
1st January	New Year's Day
17th of the Islamic month of Rajab	Isra and Mi'raj
1st May	May Day
26th June	Eid al-Fitr
1st July	Independence Day
10th of the Islamic month of Dhu al-Hijja	Eid al-Adha
9th or 10th of the Islamic month of Muharram	Ashura
10th of the Islamic month of Rabi' al-awwal	The Prophet's Birthday

Shops and public services may be closed on these dates. (Some dates change depending on the lunar and Islamic calendars).

Emergency contact numbers

Police & Fire service: 888
Ambulance: 999

Map of Somalia



Disclaimer

Whilst the information in this document was collected with great care and careful attention, Hibiscus Initiatives does not guarantee the accuracy of this information. Hibiscus Initiatives does not endorse any views, opinions or policies expressed by any organisations referred to in this document and accepts no responsibility for any conclusions or results based on information provided in this booklet. This publication does not constitute an offer, solicitation, or recommendation for the sale or purchase of any produce or services.

Dib ugu noqoshada Somaliya



Hibiscus Initiatives waxay difaacdaa, taageertee, isla markaana ugu deeqdaa adeeg ku dhisan aqoon qoto dheer, qaxootiga faquuqan oo ay saameeyey shuruucda dambiyada iyo nidaamka qaxootinimada, iyadoo u suurto galinaysa macluumaad kala doorasho iyo isbadal haboon. Waxaan dhiiri galinnaa korna u qaadnaa cadaaladda isla markaana ixtiraamnaa yaraynta kala saraynta.

Howsha mu'asadani waxay ka kooban tahay afar qaybood

- Mujtamaca iyo xabsiyada
- Dib u dajinta heer caalami ah iyo hawlaha la xiriira xanibaadaha
- Ka hor tagga tahriibinta iyo is-xambaarka
- Mutadawacnimo iyo tawjiihin

Qaybta dib u dajinta heer caalamiga ahi waxay taageertaa dadka u baahan in loo fududeeyo sidii ay dib ugu dhexgali lahaayeen mujtamaca ku dhaqan wadankii ay asal ahaan ka soo jeedeen.

Isla markaa anoo bixinayna adeeg ku saabsan arimaha la xiriira dib dajinta, ayaan haddana waxaan hubinaa inuu kala wareeggu dadka dib ugu noqonaya dalkoodii hooyo u qabsoomo sida ugu sahlan uguna macquulsan. Inta badan, tan macnaheedu waa u tilmaamid hay'adaha bixiya taageerada, guriyeynta, u helidda warqadaha aqoonsiga iyo baasaboorka, ka saacididda safarada gudaha, la xiriirka qoysaska iyo isla markaa siinta qoondo lacageed oo ay u kaalmaystaan haddii ay iskood unkanayaan ganacsi.

Hawlaheenna shaqo waxay muhiim u yihiin dadka somliyeed ee ka quustay xuquuqda ku baaqi ahaanshaha dalka UK, sidaa darteedn danaynaya inay si iskood ah u baxaan wadnkan, sidoo kale kuwa la tarxiilay ka dib markii dhamaystirteen xabsiga lagu xukumay fal –danbiyeed ay gaysyteen awgeed.

Nagala soo xiriir

Haddii aad danaynasid inaad wax ka ogaatid hawlaha ay fuliso Hibiscus Initiatives, ama ay ku soo gaarto taakulayn, ama aad ogtahay qoys ama saaxiib laga yaabo inuu u baahi qabo taakulaynteenna, fadlan nagala soo xiriir:

Hibiscus Initiatives

Resource for London
356 Holloway Road
London N7 6PA

Email: info@hibiscus.org.uk

Website: <https://www.hibiscusinitiatives.org.uk>

Phone: +44 (0)20 7697 4120

Fax: +44 (0)20 7697 4272



Tusmada

Hordhaca	18
Qorshaynta dib u noqoshada	19
Taakulaynta dib u dhexgalka mujtamaca	
Daawada	
Qoyska iyo saaxiibada	
Ururada diiniga ah	
Waxyaabaha aad filanakarto markaad nabad tagtid	20
Qaabilaadda Gegida diyaaradd	
Gaadiidka	21
Macluumaad asaasi ah iyo dokumenti muhiim ah	22
Warqadda aqoonsiga	
Ogolaashaha baabuur wadidda	
Furshada xisaabta bangiga	
Deegaan	23
Faya dhorka	24
Dulmar	
Magacyada goobaha caafimaadka	
Caafimaadka galmada iyo dhalmada	
Talabixinta dhimirka iyo bulshada	
Waxbarashada iyo shaqooyinka	25
Waxbarashada	
Shaqaalaynta iyo tababarada	
Macluumaad waxtar leh	26
Sicirka quutal daruuriga	
Ayaamaha magaca wayn iyo ciidaha wadaniga	
Nambarada gargaarka degdegga ah	
Khariidada Somaliya	27
Afeef	28

Hordhaca

Buuggan yar waxaa loogu tala galay inuu ku siiyo macluumaad kaa caawinaya fududaynta dib ugu noqoshada somaliya. Gudahiisa waxaad ka heleysaa macluumaad guud oo ku saabsan noqoshadaada, waxyaabaha aad filan karto iyo liiska magacyada mu'asasooyinka laga yaabo inay ku siin karaan taakulayn ku aadan waxkasta oo la xiriira dib u dejinta iyo qaabka aad ula xiriiri kartoba.



Qorshaynta dib u noqoshdada

Hadba inta uu la egyahay qorshaynta dib ugu noqoshadaa somaliya, ayaa waxay horseedi kartaa habsami uga faa'iidaysiga taageerada aad heli karto markaad nabad tagto. Waxaa jira waxyaabo badan oo u baahan inaad ka sii fakarto intaadan ka safrin UK, oo ka mid yihiin: Yaa kugu qaabili doona gegida diyaaradaha? Halkeed ku nagaan doontaa? Ehelkaaga iyo saaxiibadaa awood ma u leeyiin inay ku caawiyaan dhaqaala ahaan iyo qalbi-dejinba, ama sidoo kale inay kaa caawin karaan la qabsashadaa nolosha somaliya?

Inta aadanba ambabixin waxaad u baahan tahay inaad ka sii fakartid umuurahan soo socda:

Taakulaynta dib u dhexgalka

Waxaa laga yaabaa in aad suubatto soo dalbashada taakulada dib u dhexgalka oo ay qoondaysay hay'adda caalamiga ah ee International Organization for Migration (IOM), oo qayb ka aha barnaamijka 'EU-IOM Joint Initiative in Africa'. Waxay durbadiiba ku siin karaan taakulayn degdeg ah, isla markii aad somaliya gadhid oo isugu jirta qaabilaad iyo howl fududaynba gudaha gegida diyaaradaha, daabulid iyo jiiifka habeenimadaas, caafimaadka degdeg ah iyo waliba waxoogaa lacag ah oo aad ku dabooshid baahidaada degdegga ah ee markaas taagan.

Hay'addani waxay xiriir ballaaran la leedahay shabakad iyo mu'asasaad kale duwan kuwaas oo kuu tilmaami kara ilo kale oo aad ka heli karto musaacado ku aadan baahidaada khaas ah. Waxay kaloo kaa caawin karaan in aad hesho tababar xirfadeed iyo bandhigyo shaqooyin.

Somaalida ka noqonaysa UK, danaynayan ka faa'iidaysiga barnaamijyadan taakulaynayd, waa in ay ugu horrayn soo maraan hay'adahaas ka dhisan UK, ka hor intaysanba u safrin somaliya. Xubin ka mid ah shaaqaalaha Hibiscus Initiatives ayaa xiriir kuula samayn kara hay'adda taakulaynta bixisa ee IOM ayagoo ku matalayana u gudbinaya arjiga codsigaaga. Waa muhiim inaad nala wadaagtid macluumaadkaas oo dhamays tiran intii karaan kaaga ah si aad ugu guulaysatid fursadaha taakulaynta ee ugu haboon.

Daawaynta

Waa muhiim inaad la xiriirto dhakhtarkaaga intaadan u kicitimin somalia. Haddii waqtigan xaaliga ay kuu socoto daawo, dhakhtarkaagu wuxuu kaa caawin karaa inuu kuu tilmaamo sida aad u sii wadan daawadadaa. Waxaa wax ku oo ah in aad ka qaadatid dhakhtarkaaga warqad qeexaysa xaaladaada caafimaad. Hadba inta macluumaad waafi ah ka haysa xaaladaada caafimaad ayaa kuu sahli karta si wadashada la tacaalkeeda ka dib nabadtaggaaga.

Caa'ilada ama saaxiibada

Haddii aad leedahay caa'ilo ama saaxiibo ku sugan somaliya, waad ku wargalin kartaa imaanshahaaga si ay kaaga caawiyaan baahidaada degdeg ah xilliga aad noqotid. Isku day inaad haysatid xiriirkooda si aad ula xiriirto ka hor intaadan safrin iyo markaad gaartid gegidaba. Hay'adda laaqayrta Cas, waxay diyaar kuula tahay adeeg lacag la'aan oo loogu talagay dib isugu keenidda caa'ilooyinka kala irdhoobay. Si aad uga faa'iidaysato barnaamijkan, waxaad toos ugala xirii kartaa cinwaankoodan:

Cinwaanka: British Red Cross, UK Office, 44 Moorfields, London EC2Y 9AL

Email: contactus@redcross.org.uk

Phone: +44 (0)344 871 1111

Website: www.redcross.org.uk

Mu'asasaadka diiniga ah

Waxaad ka heli kartaa UK mu'asasaad dini ah, kuwaasoo kaala talin kara ilaha taakulaynta iyo goobo cibaadaysi goobaha aad ku noqonaysid. Mu'asasaadkaas diiniga ahi waxay bixiyaan musaacadooyin, waxay rabaan ha aaminsanaadeene. Halka ugu haboon oo laga bilaabana waa inaad la xiriirto mujammacaatka ama imaamka kuugu dhow ee aad heli karto. Waxaa lagugula taliniyaa in aad la tashato hogaamiyayaasha mujammacaatkaas iyo imaamyada sida ugu horaysa, sid aad goor hore ugu heshid diyaar garowgii lagu samaeeyey.

Waxyaabaha aad filan kartid markaad nabad tagtid

Gaaridda gegida diyaaradda

Ka dib marka ay caga dhigato diyaaraddaadu gegida diyaarahay, waxaa ugu horrayn lagu geeynayaa xaafiiska gegida, halkaasoo lagu fududayn doono gelitaanka somaliya. Intaa hadib waxaad joogtaa Somaliya, sidaa dartaad waxaad u baahnaan doontaa inaad ka fakarto la kulanka kulanta caa'iladaada iyo saaxiibadaa, helintaanka shuqul, warqad aqoonsi, iwm.



Gaadiidka

Goobta ugu habboon oo soomalia laga geli karo xagga hawada waa gegida diyaaradaha ee Muqdisho. Halkaas waxaad ka sii heli kartaa safarro dhulka ah oo ku aaddo gudaha somaliya.

Basaska

Gaadiidka loo yaqaan BL-ka ayaa ah qaabka ugu badan ee lagu socdaalo somaliya. Gudaha magaaloyinka waawayn iyo kuwa u dhawdhaw, gaadiidkana waxay ku hakadaan meelkasta oo wadada ah, waana loo gacan haatin karaa. Waxay u kala socdaalaan magaaloyinka Hargeysa, Borama, Burco iyo Berbera, qiimaha lagu raacaana wuxuu ka yar yahay hal doolar (US \$1). Tagaasi wadaag ah ayaa can ku ah Somalia, rakaabkuna si sahal ayey ugu boodaan kaga degaan baabuurta.

Tagaasida iyo Bajaajka

Tagaasida waxaa laga qaadan karaa wadooyinka, umana baahna inaad horay usii dalbatid. Shirkadaha tagaasida sida Mogadishu Taxis iyo City Taxi, qiimaha gudaha magaalada lagu raaco wuxuu u dhexeeyaa 8 doolar ilaa 25 doolar.

Sidoo kale, Yaasmiin Transportation Group waxay sameeyaan safarro waddank gudihiisa ah. Safarda, waxaad ka sii dalban kartaa:

Phone: +252 907 722 660

Website: <https://yaasmiingroup.com/website>

Qiimaha Bajaajku waa kala bar qiimaha basaska, haddii loo baahdana waa laga gorgortami karaa.



Macluumaad asaasi ah iyo dukumentu muhiim ah

Warqadda aqoonsiga

Warqadda aqoonsiga waxaa bixiya dawladda hoose ee Muqdisho. Talada ugu wacani waa inaad toos uga dalbatid dawladda hoose, haddii ay cusboonayn ama mid cusub tahayba, lagana fogaado gacan sedexaad maaadama aysan marwalba ahayn mid rasmi ah.

Waxaa lagaaga baahan yahay inaad wadato warqadda aqoonsiga markii aad ku dhex safraysid wadanka gudihiisa. Sidoo kale waa muhiim markaad shaqo doon tahay, ama banki furanaysid, ama aad dugsiyada waxbarashada iska soo diiwaan galanasid, ama aad gadanaysid mobile, ama aad u baahato adeegga guud. Waxay qaadataa dhowr maalmood inaad ku hesho warqadda aqoonsiga. Qiimaha aad ku heli karto warqadda aqoonsiga waa inta u dhexaysa 17 ilaa 19 doolar.

Waxaa inta badan dhici karta in warqadda aqoonsigga iyo basaboorku wada socdaan, oo isku halmar aad wada heli kartid.

Baasaaboorka oo kaliya qiimihiisu waa qiyaastii 110 doolar.



Ogolaanshaha wadidda Gaadiidka

Waxaad ka dalban kartaa ogolaanshaha wadidda gaadiidka Wasaaradda Gaadiidka Dadwaynaha ee Mogadishu. Waa inaad adigu toos uga dalbatid adigoo u gudbinaya magacaaga oo dhamaystira, goorta iyo goobta dhalashadaada iyo wiliba afar masawir oo ah noocan baasaboorka. Qiimaha ogolaashahan wadidda gaadiidka waa qiyaastii 170 doolar. Sidoo kale waxaa lagaaga baahan yahay inaad ku gudubtid imtixaanka wadidda gaadiidka haddii aad doonaysid inaad gaadiid ku wadid somaliya gudeheeda.

Nooca ogolaansha wuxuu ku xiran yahay nooca gaadiidka aad doonaysid inaad kaxayso. Tusaale 'Grade A' laysin waxaa lagu wadi karaa gaadiidka la eg Land Cruiser, 'Grade B' waxaa lagu kaxayn karaa basaska iyo gawaarida xamuulka, 'Grade C' waxaa lagu kaxayn karaa gawaarida tareelayaasha iyo kuwa aadka u culus.

Furashada xisaabta bangiga

Haddii aad somaaliya ka furanaysid xisaab bangi waxaad u baahan tahay inaad la timaadid warqaddo aqoonsi oo caddaynaya aqoonsigaaga shakhsiga ah iyo degenaanshahaagaba. Haddi aadan keeni karin warqaddahaas lagagaa bahan yahay, waxaa macquul ah in lagula kulansiiyo maamulka bankiga si aad ugu sharaxdo duruufahaaga khaaska ah, ka dibna sidaas laguugu bilaabo isticmaalka xisaabta bankiga.

Somaliya waxaa ka shaqeeya dhowr bangi ganacsi sida: Salaama Bank, Dahabshil, Amal Bank and Premier Bank.

Deegaanka

Haddii aysan kuu suurto gal ahayn inaad la degto caa'iladaada ama saaxiibadaada, waxaad heli hartaa deegaan ku meelgaar ah. B&B's iyo albeergooyinka waxaa lagu helaa qiimo macquul ah meelo ka mid magaaloyinka waawayn. Website-ka hoos ku qoran ayaad ka heli kartaa deegaan haboon adigoo wali jooga UK iyo markii aad nabad tagto soomaaliyaba. waa inaad toos ula xiriirto si aad u ceshato meel aad dhinaca dhigto isla markaana aa qadimtid qiimaha negaanshahaagaba:

<https://www.hostelworld.com>
<https://www.booking.com>
<https://www.expedia.com/Hotels>
<https://www.airbnb.com>

Hay'adda caalamiga ah ee xaqootiga 'International Organization for Migration (IOM)' waxay kaa kaalmayn kartaa deegaan aad ku nagaato habeenka aad gaaartid somaliya, taasoo qayb ka ah barnaamijka taakulada dib-u-dhexgalka dadka. Tanise waxay u baahan tahay in aad horay uga sii baaraan tagtid intaadan u duulin somaaliya. Howlwadeenada Hibiscus Initiatives iyo ururro kaleba waxay kuula xiriiri karaan IOM si ay kuula socodsiiyaan waxyaabaha aad xaqqa u leedahay iyo waliba inay kuu soo dhameeyaanba xaqqaas. Waa muhiim inaad ugu talo gashid waqti ku filan oo laguugu diyaaryo taakulada qoobtii aad ku yara negaan lahayd xilliga aad gaadho somaliya.



Faya dhowrka

Dulmar

Somaliya waxaa ka jira faya dhowrro kala duwan oo usugu jira kuwo gaar loo leeyahay iyo guudba. Dhamman goobahaas caafimaad waa lacag, inkastoo ay jiraan goobo caafimaad oo hoos yimaada hay'adaha aan dawliga ahayn, kuwaasoo ku siinaya adeeg lacag la'aan ah.

Soomaliya waxaa si aad ugu soo kordhaya goobaha caafimaad ee khaaska loo leeyahay, kuwaaso aad u horumarsan kana howl galaan shaqaale ku soo takhasusay howlahaas. Goobahaas caafimaad ee gaarka loo yahay ayaa aad uga qaalisan kuwa caamka ee hoos yimiaada hay'adaha dawliga ah.

Magacyada goobaha caafimaadka

East Bardera Mothers and Children's Hospital

Cinwaanka: Baardheere, Gedo
Phone: +252 61 754 7871

Erdoğan Hospital

Cinwaanka: Mogadishu
Phone: +252 61 112 2595

Erdoğan Hospital

Cinwaanka: Presidency Road, 26 June District, Hargeisa
Phone: +252 2 523 114

Gargaar Multispeciality Hospital

Cinwaanka: Gargaar Hospital Road, Hargeisa
Phone: +252 63 451 4727

Caafimaadka galmada iyo dhalmada

Haydda caalamiga ah ee United Nations Population Fund (UNFPA) ayaa kala shaqeeya dawladda Somaliya sidii loo hubin lahaa, gudbinta caafimaadka dhalmada, gaar ahaan barnaamij ku wajahan taakulaynta da'yarta. Howlwadeenadooda ka hawl gala Muqdisho, waxay ku siin karaan adeeg lagac la'aan ah, ha ahaato mid bukaan socod ama bukaan jiiifba, macluumaad ku saabsan caafimaadka galmada iyo caabuqa lagu kala qaadoba iyo waliba macluumaad ku saabsan kala fogaynta dhalmada. Waxaa kale oo la heli karaa faydhowr la xiriiira dhalmada degdeg ah iyo la tacaalidda qalalaasaha galmada. Wixii macluumaad intaas ka faahfaahsan, waxaad kala xiriii kartaa goobaha caafimaad ee kuugu dhow.

Talo iyo tusaalaynta cudurka dhimirka

Haddii aad qabto baahi caafimaa ee dhimirka ama u baahan tahay talo iyo tusaaloba, waxaa lagu guddin karaa adeegga ugu habboon, markii la kulantid dhakhtarkaaga.

Muqdisho waxaa ka hawl gala isbitaal ku siin kara talo iyo tusaalo- bixin ku aaddan baahida caafimaad ee dhimirka, sida:

Habeb Public Mental Hospital & Rehabilitation Treatment Center

Cinwaanka:
Phone: +252 61 589 9081 (Dr. Habeb)
Email: jHabebmnh@gmail.com

Waxbarashada iyo shqooyinka

Waxbarashada

Waxbarasha aad kala dooran karto ayaa ka jirta caasimadaha iyo magaalooyinka waawayn. Inta badan waxbarashadu waa lacag, hase ahaatee ururada aan dawliga ahayn waxay bixiyaan barnaamij waxbarasho lacag la'aan ah, sida UNICEF oo ka hawl gasha dhammaan somaliya, siisana waxbarashada asaasiga ah, horumarinta xirfadaha iyo isla markaa waxbarasha da'yarta ay la soo gudboonaatay xaaladda degdegga ahi. Dugsiyada hoose waxay socdaan afar sano, laga soo bilaabo da'da 6-jirka. Waxaa ku xiga dugsiga dhexe oo afar sano oo kale ah, halkaasoo ardayda lagu baro sagaal maaddo oo khasab ah.

Dugsiga sare wuxuu qaataa afar sano, laga soo bilaabo da'da 15aad ilaa 18aad. Markaa kadib ardaydu waxay u fariistaan shahaada dugsiga sare ee Puntland (Puntland Secondary School Certificate Examination (PSCE)). Haddii aad si buuxda usoo dhamays tiratid shahaada dugsiga sare, ardaydu waxay iska diiwaan galin karaan waxbarasha sare ee jamaacadaha. Inta badan darajada koowaad waxay qaadataa afar sano.

Shaqo galinta iyo tababarada

Tababarka xirfadaha ayaa laga heli karaa meelo ka mid ah magaalooyinka waawayn, oo loogu talagay dadka aan shaqaynin iyo da'yarta. Tababaradaan waxaa sida badan bixiya hay'adaha aan dawlaga ahayn, kuwaasoo ku deeqa taakulaynta fursadaha tababarada iyo shaqaalaynta, sida:

Shaqodoon Organization

Waxay bixisaa barnaamijka unkidda ganacsi, oo loogu talo galay dadka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 35 sano oo ku sugan dhammaan Somaliya iyo Somaliland, si ay ula jaanqaadaan fursadaha shaqaalaynta. Waxay kaloo bixiyaan tababarro xirfado ganacsi sida ICT. Ujeedada ka dambaysana waa helitaanka shaqooyin la jaan qaada qofkasta xirfaddiisa.

Fursadaha tababar ee soo socda waxaa inta badan lagu xayeysiiyaa bogagga baraha bulshadaha.

Phone: +252 2 515 777

Email: info@shaqodoon.org

Website: <https://www.shaqodoon.org>

Facebook: <https://business.facebook.com/ShaqodoonOrganization/>

Instagram: @shaqodoon.org_252

Borama Youth Job Centre

Waa hay'ad khayri ah oo ka howl gashada dhinaca waqooyiga magaalada Boorama, Somaliland. Waxay da' yarta shaqo la'aanta ah oo baadi goobka ugu jira shaqooyin u fuliyaan khidmado dhowr ah. Waxay isku soo duwaan isu imaatanno lagu wadaagayo waayo aragnimada kala duwan, si loo xamaasad iyo dhiirri galiyo shaqo-doonku inay iskood u bilaabaan ganacsi gudaha magaaladooda.

Waxay kaloo bixiyaan tababarka farsamada gacanta, sida dayactidka moobaylada, faryaamada, korontada, qurxinta, tollidda, iyo dubista rootiga IWM. Tababaradan xagga shaqada iyo xirfadda waxaa loogu talo galay inay ka caawiyaan shaqo-doonka diyaarinta siiro-shakhsi (CV) iyo kor u qaadidda awoodda qaabilaadda shaqo (job interview). Waxaa kale oo la helaa barnaamijyo khaas ah oo ka taakulaynaya shaqo-doonka diyaarinta qorshaha ganacsiga iyo unkid ganacsi yaryar isla maagaladooda.

WhatsApp: +252 63 441 0299

Email: byjobcentre@gmail.com

Facebook: <https://business.facebook.com/byjobcentre/>

Macluumaad muhiim ah

Qiimaha nolosha

Cunnada	Qiimaha (doolar)
Rooti 1 duub	0.65
Caano 1 Litre	1.34
Biyo dhalo 1.5 litre	0.58
Baris 1kg	1.02
Ukun 12 xabbo	2.19
Jubnad 1kg	5.75
Hilib digaag 1kg	4.32
Hilib xoolaad 1kg	1.03
Baradho 1kg	0.90
Basal 1kg	0.90
Kable (raasow)	1.00
Yaanyo 1kg	2.68
Liin-macan bortuqaal 1kg	3.72
Tufaax 1kg	1.38
Moos 1kg	90.80
Socdaalka	
Hal socdaal (gaadiidka gudaha)	0.25
Tagsi 1km	20.00
Tagsi 1 hour	10.00
Waxyaabo kale	
1 min. cabaynta mobile (gudaha)	0.09
Internet-ka (60 mbps iyo ka badan, unlimited data)	25.00-32.00
Caanaha Formula	10.00
Xafaayadda	0.05-0.07 per diaper
Mushaaraadka	
Celceliska musharka billaha (ka dib canshurta)	362.50

Waxay Sax ku tahay Oktoobar 2021

Maalmaha muhiimka ah

iyoo ciidaha qaranka


Taariikh	Magaca ciidada
1 Jannayo	Sanadka cusub
17 Rajab	Isra iyo Micraaj
1 Maajo	Maalinka shaqaalaha
26 Junyo	Maalinta xorriyadda
1st Lulyo	Maalinka xorriyadda
10 bisha Dul-Xaj	Ciidul al-Adxa
9-10 Muxaram	Caashura
12 Rabiicul Awal	Dhalashada nabiga

Dukaamada iyo adeegga guud ayey u badan tahay inay xirnaadaan maalmahaas. (Ttaariikhaha qaar waxay ku xiran yihiin dhalasha bisha Hijriga).

Lambarada degdegga ah

Boolisha iyo dab-damiska: 888
Ambalaas: 999

Khariidada Somaliya



Inkastoo macluumaadka dokumentigan la isugu keenay si taxaddar buuxa ku jiro iyo foajignaanba, Hibiscus Initiatives ma damaanad qaadayso saxnimada macluumaadkan. Hibiscus Initiatives ma qirsana aragti, rayi iyo shuruucda urur kasta ee dokumentigan ku xusan. Mana aqbalayso mas'uuliyadda go'aanka, maxsuulka iyo macluumaadka lagu xusay buug-yarahan. Daabacaddan kama turjumayso bandhig, maldihid, xayeyisiin ama tazkiyada beecinta mid kasta oo ka mid ah badeecada iyo adeegyada la soo xusay.

Published by
Hibiscus Initiatives
Resource for London,
356 Holloway Road, London,
N7 6PA, United Kingdom

hibiscusinitiatives.org.uk

First published 2021
© Hibiscus Initiatives

Design: Prospectus

This publication is copyright,
but may be reproduced by
any method without fee or
prior permission for teaching
purposes, but not for resale.

For copying in any other
circumstances, prior written
permission must be obtained
from the publisher, and a fee
may be payable.

Waxaa faafiyey
Iniciativas Hibiscus
Resource for London,
356 Holloway Road, London,
N7 6PA, United Kingdom

hibiscusinitiatives.org.uk

Daabacadda kowaad 2021
© Hibiscus Initiatives

Wuxuu ka dhagan yahay:
Prospectus

Daabacaddan waa mid gaar loo
leeyahay, ha yeeshee dib ayaa
markale loo soo saari karaa wixii
la adeegsadaba si lacag la'aan
ah ama aan loo baahnaanin
ruqsad, haddiiba loola jeedo
waxbaxin, laakiin marnaba laba
sii beecin karo.

Haddiiba loo baahdo in loo sii
badiyo duruuf kastoo jirtaba,
waa in laga haystaa ruqsad
qoraal ah soo saaraha, waxaana
laga yaabaa inaad bixiyo
qiimaha u dhigma.

